

Xiriritaanka ku lug leh Qorshaha waxbarashda gaarka ah

Communication in the Special Education Process (Somali Version)

Kulanka ku saabsan waxbarashada gaar ahaaneed (IEP) iyo kuwa kaleba waxa ay muhiim u yihiin waxbarashda ilmaahaaga. Waajibka waalidka saran kuma koobna kaliya iyaga oo aqbala amase loo faahfaahiyo. Waalidku waa in ay waydiiyaan su'aalo, la shir tagaan waxyaabo ilmaha khuseeya oo laga wada hadlo, warbixin iyo tusaalo ka dhiibtaan kulanka.

Waalidku waxa ay keeni karaan kulanka qof kale. Qof walba oo ka mid ah kulanka waxa uu ka shaqaynayaa wax u dan ah ilmaha. Waalidku waa muhiim ka mid ah kulanka.

Xiriirka midhaha lihi waa mid ka socda labada dhinacba, oo loo baahayahay in waalidka iyo shaqaalaha iskuulku isku taageeraan si ay go'aan fiican u gaadhaan. Si go'aan faa'iido leh oo xiriiritaan ku lug leh loo gaadho waa in ay waalidku:

- Isku dayaan sidii wadahadalku ku koobnaan lahaa ilmaha.
- Sii tabaabulshaystaan. Ogaadaan waxyaabaha muhiimka ah ee loo baahayahay in laga wada hadlo iyo su'aalaha u baahan in la waydiiyo siina qortaan waxa ay la shir tagayaan.
- Dhagayso. Dhagaysigu waxa uu kuu hawl yarayaa si aad warbixin badan u hesho iyo sidii aad u fahmi lahayd fikrado kala gadisan.
- Waa in aad si cad u sheegataa wixii aad gocanaysid. Ula hadal si cad oo toos ah.
- Waydii su'aalo. Su'aalaha oo aad wadiisa waxa ay kuu fududaysaa in aad fahamto kuuna hawl yarayso qodobka laga wadahadlayo.
- Isku dayi in aad mar labaad fahamsiiso hadii marka hore kuu suurtoobi waydo.
- Waa in aad kalsooni muujiso. Ma aha in aad ka xishooto in aad su'aal waydiiso amabase aad isku daydo in aad hesho wixii uu ilmahaagu u baahanyahay. Waa waajib iyo xuquuq aad leedahay.

- Waa in aad kalsooni muujiso. Ma aha in aad ka xishooto in aad su'aal waydiiso amabase aad isku daydo in aad hesho wixii uu ilmahaagu u baahanyahay. Waa waajib iyo xuquuq aad leedahay.
- Waa in aad wada shaqaysaan. Ogow in adiga iyo dadka khibrada o lehiba aydaan jawaab u hayn su'aal walba. Koox ahaan u wada shaqeeya si aad xal ugu heshaan. Qof kasta oo kulanka ka mid ehi waa iskumid olajeedadiiso — taas oo ah si ilmaha loogu qorsheeyo waxbarasho ku habon.

Adiga oo isku diyaariya oo u firfircoon ka qayb galka waxbarashada ilmahaaga ayaa waxa ay keentaa xiriiritaan midho leh.